



## Trisam – Dib u hawlgelin la iska kaashanayo Iskaashi iyo warbixin is weydaarsi

Trisam waa wada shaqeyn ka dhexeysa gobolka Gävleborg (daryeelka asaasiga ah iyo qeybta cudurrada maskaxda), Qasnadda ceymiska, Xafiiska shaqada iyo degmada. Wada shaqeynta kooxda Trisam-team waxey ka jiraan degmooyinka Gävleborg oo dhan. Kooxda Trisam-team waxaa ka hawl gala shaqaale daryeelid iyo gacan hayayaal ka socda gobolka Gävleborg, Xafiiska shaqada, Qasnadda ceymiska iyo degmada. Waxaan ka shaqeynaa in aan sameyno caawimaad wanaagsan oo hal meel ah oo wanaajineysa tabarkaada dib u hawl gelined.

### **Si warbixin loo gudbiyo waxaa loo baahan yahay oggolaansho**

Si aan kuugu caawinno sida ugu waansan waxaan u baahannahay warbixin aan kulligeen ka simmannahay oo adiga iyo xaaladdaada ku saabsan. Sidaas darteed waxaa loo baahan yahay oggolaansho qoraal ah oo aad noogu oggolaaneyso in aan warbixinno lagama maarmaan ah oo adiga kugu saabsan aan is weydaarsan karno. Macluumaadkaas sidooda kale wey xafidan yihiin.

### **Macluumaad lagama maarmaan ah waxey yihiin tusaale ahaan.**

- Xaalado caafimaad
- Shaqada uu qofka qabto
- Dib u hawl gelin hore
- Xaalada bulsho iyo mid dhaqaale
- Baaritaanno hore
- Faallo khubaro, sida faallo daaweed
- Warbixin kale oo muhiim u ahaan karto dib u hawl gelintaada

Foomka oggolaanshaha waxaad ka heleysaa bogga kan xiga. Oggolaanshaha waxuu ka billaabnayaa maalinta aad saxiixdid foomka iyo inta lagu guda jiro waqtiga ey socdaan hawlaha dib u hawlgelinta oo ey kooxda Trisam waddo. Waxeyna jiri doontaa saddax sano laga billaabo marka aad saxiixdo oggolaanshaha.

**Marka aad rabtid ayaad dib ula laaban kartaa oggolaanshaha.** Haddii aad rabto in aad sidaas sameyso waxaad la xiriiireysaa gacan hayahaaga hey'adda markaas ku shaqada leh arrimahaada ama daryeelahaada jooga xaruntaada caafimaadka.



## Oggolaansho ku aaddan iskaashi iyo warbixin is weydaarsi ee Trisam

Magaca	Tobanka nambor ee dhalashada
Cinwaanka boostada	Namabrka boostada iyo goobta
Taleefan nambor maalintii	Moobayl

### Oggolaansho

Waxaan shaqaalaha ey quseyso ee xarunteyda caafimaadka ee leygu daryeelo, gacanhayaheyga Qasnadda ceymiska, Xafiiska shaqada iyo gacanhayaha degmada u oggolaanayaa in ey kawada shaqeeyaan waxyaabaha aan u baahanahay. Waan oggolahay in haddii ey lagama maarmaan tahay shaqaalaha goobahaas ey is weydaarsadaan warbixin igu saabsan isla markaana ey qeyb ka qaataan warqadaheyga diiwaanka bukaanka iyaga oo aan caqabado kala kulmin sir xafidid, si ey iyaga oo Trisam u maraya iiga caawiyaan boroseeska dib u hawl gelinteyda. Waxaan kaloo oggolahay in shaqaalaha Samordningsförbund Gävleborg ey ila soo xiriiri karaan muddo 3 sano ah laga billaabo marka aan saxiixo oggolaanshaha.

Waan ogahay in in aan dib ula noqon karo oggolaanshaha marka aan rabo. Waxey ka dhigantahay in haddii aan dib ula noqdo oggolaanshaha in aan la isticmaali karin macluumaad kale oo aniga igu saabsan. Macluumaadka hore leyga sii qaaday laakiin waa la isticmaali karaa, laakiin lama dhameystiri karo lamana cusbooneysiin karo.

\_\_\_\_\_

Saxiix

\_\_\_\_\_

Taariikh

\_\_\_\_\_

Magaca oo kala waadix ah

### Aqoonsi qof oo xafidan/Macluumaad qof oo xafidan

Dadka qoonsigoodu xafidan yahay ama macluumaadkooda qofeed xafidan yahay qeyb kama ah hawsha iskaashi ee Trisam. Sidaas darteed ma saxiixeysid foomka oggolaanashaha haddii aqoonsigaaga qofeed uu xafidan yahay ama macluumaadkaada qofeed uu xafidanyahay.

### Su'aalo?

Haddii aad su'aalo ama aragtiyo qabtid adiga oo mahadsan ayaa la xiriiri kartaa gacanhayahaaga goobta ku shaqada leh ama daryeelahaada xaruntaada ama goobtaada caafimaad.